



2022-06-21

Ku socotoa: *Waalidka*

Mar dhow waxaad heli doontaa barta waxbarashada ee Unikum

23 Juun waxaa la xidhayaa InfoMentor (kaas oo laga isticmaalo dugsiga hoose-dhexe) oo laga bilaabo deyrta 2022 waxaa adigaaga carruur u dhigato dugsiga xanaanada, dugsiga hoose-dhexe ama carruur ka yar 18 jir kuna jirta dugsiga sare aad helaysaa barta waxbarasho Unikum.

Bartan waxbarasho waxay ka dhexeyso dhammaan nidaamyada iskool oo fursad kuu siinaysaa inaad ka warhaysa oo aad ka qaybqaadato waxbarashada ilmahaaga.

Waxaad kale oo aad isticmaali doontaa aab-ka Edlevo kaas oo dhammaystir u ah Unikum. Halkaas ayaad ka samaynaysaa wargelinta maqnaanshaha kana maareynaysaa jedwalka ilmahaaga ku jira dugsiga xanaano iyo hoyga xilli firaaqaha. Haddii aad haysato carruur ka yar 18 jir oo ku jirta dugsiga sare waxaad xitaa helaysaa qorshaha waxbarasho ee ilmahaaga iyo shahaado ku jirta aab-ka.

Bilaabo Unikum

Waxaad Unikum u isticmaal kartaa aab ahaan iyo dhanka bog akhriye kombiiyuutar, shaashadda yar ama telafoonka moobilka. Taladu waa in aad ugu horrayn isticmaasho aab-kan, kaas oo loo yaqaan "Unikumum Familj".

Waxaad soo dejisanaysaa aabka Unikum Familj kaas oo aad ka helayo aababka iPhone iyo telafoonada andaroyd-ka. Unikum familj waxaa la helayaa isagoo ah af Iswiidhish iyo Ingiriisi labadaba.

Gal gudaha aabka Unikum familj

Waxaad ku galaysaa oo aqoonsigaaga ku dhiibaysaa iyadoo aad dhag ka siinayso Bank-id (aqoonsiga elaktarooniga).

Ka gal Unikum dhanka bogga intarnatka

Haddii aad doorato in aanad ku shuban aabka waxaad Unikum ka gelaysaa dhanka:

skelleftea.se/skolportalen

- Dooro "Gal Unikum".
- Dooro "Qaabab kale oo loo galo".
- Raadi oo dhag ka sii "Degmada Skellefteå looguna talogalay waalidka".

Logga in i Unikum

Användarnamn

Lösenord
 Glömt lösenordet?

eller

A red arrow points to the "Andra sätt att logga in" button.



2022-06-21

Ku socotoa: *Waalidka*

(Doorka dambe ee aad gasho waxaad arki doontaa degmada Skellefteå oo toos ugu jirta liistadan.)

Si loo galo Unikum waxaa shuruud u ah in aad haysato aqoonsiga elaktarooniga (Bank-ID).

Haddii aanad haysan aqoonsiga elaktarooniga, la xiriir degmada Skellefteå adeegeeda macaamiisha ee 0910-73 5000.

Haddii aanad haysan lambarka shahsiga ee Iswiidhishka waxaad Unikum ku geli kartaa sms, markaas ayaad dooranaysaa doorashada "Ku gal sms".

Haddii aad la kulanto dhibaato dhinaca ku gelidda sms-ka la xiriir degmada Skellefteå adeegeeda macaamiisha ee 0910-73 50 00.

SMS-inloggning gäller för dem som saknar fullständigt personnummer,
läs mer här

MOBILNUMMER

LOGGA IN

Hubso in macluumaadkaaga xiriirka ee ku jira Unikum ay yihiin sax

Hubi in cinwaankaaga ii-maylka iyo telafoon iyo moobil lambarka ku jira Unikum yihiin sax. Waa muhiim in aad leedahay cinwaan ii-mayl ku jira si aad u hesho macluumaadka ay qaybtan kuu soo dirto.

Haddii macluumaadkaaga xiriirka ay ka maqanyihiin ama yihiin qalad markaas waa inaad ka cusboonaysiiso degmada Skellefteå adeegeeda elaktarooniga Dhiib macluumaadka xiriirka ama gudaha aabka Edlevo. Macluumaadkaas waxay u wareegayaan Unikum inta lagu jiro habeennimada. Haddii magacaaga ama cinwaankaagu aanu sax ahayn waa inaad la xiriirto Hey'adda Cashuuraha.

Edlevo

Unikum wuxuu dhammaystiir u yahay Edlevo, halkaas aad ka diiwaan gelinayso maqnaanshaha kana maareynaysaa jedwalka ilmahaaga ku jira dugsiga xanaano iyo hoyga xilli firaqaqaha. Haddii aad haysato carruur ka yar 18 jir oo ku jirta dugsiga sare waxaad xitaa helaysaa qorshaha waxbarasho ee ilmahaaga iyo shahaado ku jirta Edlevo. Edlevo waxaa la helayaa isagoo ah aab oo waxaad ka soo dejisanaysaa halka laga helo aababka iPhone iyo telafoonada andaroyd-ka.

Tani ayaa laga maareeyaa Unikum familj iyo gudaha Edlevo ee dhanka **dugsiga xanaanada**.



2022-06-21

Ku socotoa: *Waalidka*

Hawl	Edlevo	Unikum Familj
Gudoomidda fariimo iyo warbixin ka timi dugsiga xanaano		✓
Diiwaan-gelin/baddalka jedwalka ilmo	✓	
Wargelinta maqnaansho	✓	
Helida dugsiga xanaano qorshayaashiisa		✓
Helidda dugsiga xanaano qoraaladiisa		✓

Tani ayaa laga maareeyaa Unikum familj iyo gudaha Edlevo ee **dugsiga hoose-dhexe**.

Hawl	Edlevo	Unikum Familj
Gudoomidda fariimo iyo warbixin ka timi dugsiga hoose-dhexe		✓
Wargelinta maqnaansho	✓	
Diiwaan-gelin/helidda jedwalka iskoolka iyo dugsiga xilli firaqaha	✓	
Helidda qorshayaasha		✓
Helidda iskoolka qoraaladiisa		✓

Tani ayaa laga maareeyaa Unikum familj iyo gudaha Edlevo ee **dugsiga sare**.

Hawl	Edlevo	Unikum Familj
Gudoomidda fariimo iyo warbixin ka timi dugsiga hoose-dhexe		✓
Wargelinta maqnaansho	✓	
Helidda jedwalka iskoolka	✓	
Helidda qorshe waxbarasho/shahaado	✓	
Helidda iskoolka qoraaladiisa		✓



2022-06-21

Ku socotoa: *Waalidka*

Ma u baahantahay caawimaad?

Haddii aad u baahantahay caawimaad waxaad la xiriiri kartaa degmada Skellefteå adeegeeda macaamiisa telafoonka 0910-73 50 00.

**Salaan diiran,
Waxbarasho iyo suuq shaqo**



2022-06-21

Ku socotoa: *Waalidka*